Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kal.7-aad kul.6-aad **09/11/2015**

Kalfadhiga 7-aad
Kulankiisa 6-aad Saac.fur.11:40gd.Saac.Xir.1:00 gd.
Guntinta(Quorum) 145-Xildh.
Ajendaha:-

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**

1.Shir-guddoomiye, Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad JFS Mudane Jeylaani Nuur Iikar.

Waxaa shirka Furey Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad Baarlamanka JFS.Mudane,Jeylaani Nuur Iikar,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.

Kadib, Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo Ajendaha ,Xildhibaanadana way ansaxiyeen.

2.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in Ajendaha kulunka maanta u yahay dhaarinta Xildh.Cusub iyo dooda Hindise sharciyeedka Saxaafadda iyo qeybinta Hindise sharciyeedka lagu dhisaayo Maxkamadda Dastuuriga.

Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Xoghaynta Baarlamanka si ay u soo qoraan Xildhibaana-da ka doodaya Hindise Sharciyeedka Saxaafadda.

3.Kadib , waxaa bilaabatey doodii xildhibaanada waxaana ugu horey halkaa ka hadley :

Xildh.C/raxmaan Ibbi ,wuxu sheegay in arrintaan ay tahay mid sensitive ama ixsaasi ah ,wuxuu-na mahad u soo jeediyey Guddigii ka soo shaqeeyey,wuxuu soo jeediyey in meelaha qaar la taabto sida isbaarada Warbaahinta waa isabaaradda qalinka ,wuxuu kaloo sheegay in wadanka ay ka jiraan 37 Websideyo,waxaana iska leh hal qof .wuxuu soo jeddiyey in Wasaradda Warfaafinta iyadoo la kaashaneysa Wasaaradda Boostada iyo isgaarsiinta inay kala xiriirto cidda iska leh

waayo Saxaafadda Xur ma aha ,waxaa ku hortaal lacag bixin ama warbixintaada waxaa la soo dhigaayaa website-ka. Wuxuu intaa ku darey inay hayaan 7-da webside,waxaa lagu raadinayaa graphicis.Qof in lagu xadgudbo sharaftiisa ,dadnimadiisa iyo diintiisa waa meelka dhacweyn wuxuuna soo jeediyey in web-site-yadaas wadanka laga xayiro.

Xildh. Saciid Maxamed Cali,Salaan iyo mahadcelin u soo jeediyey Guddiga iyo Wasaaradda sharcigaan ka soo shaqeysey ,wuxuu soo jeediey in lacagta ganaaxa iyo lacagta shatiyadda ka soo xiroonaya in toos loogu shubo account-ka Xukuumadda. Iyo in la sheego shatiyadda mid walba inta laga qaadayo sida ay kala yihiin.

Xildh. Seynab Maxamed Caamir, waxay sheegtey in sharcigaan uu soo socdey ilaa 2006-kii weli waxbaa ka dhiman waayo lalamatashan saxafiyiinta madaxa banana ee Dalka ka hawgasha.waxaa la moodaa in saxaafadda dowladda loo janjeersadey ,taasoo saxaafadda dowladda waxbadan ayey qarisaa .marka yaa caddeynaya waxa ay qariso saxaafadda dawladda.

Dhibaatada kale ee jirta waa saxaafadda Soomaaliyeed aysan sameynin rag iyo haweyn oo barnaa-mijyadooda iyo wareysigooda soo qaata oo keliya ragga.waxay kaloo intaa ku dartey in 2007 ay ahayd guddoomiye k/xigeenka Guddiga warfaafinta ee Golaha Shacabka waxay soo jeedisey in la simo raga iyo haweynka.

Intaa kadib ,Guddoomiyha Golaha wuxuu soo jeddiyey in la dhaariyo Xildhibaanka Cusub oo magaciisa la yiraahdo C/raxmaan Maxamed Xuseen oo bedeley Illaah ha u naxariistee Marxuum Maxamed Cabdi Abtidoon waxaana dhaariyey Xildh.Sheekh Shaacir.

Xildh,Maxamed Cumar Dhalxa,wuxuu weydiiyey Wasiirka Warfaafinta Mudane Maareeye,in la caddeeyo sharcigii horey Dawladdii lagu soo dhisey Empigati ay ansaxisey ,sharcigaas mala laaley ama amendment ayaa lagu sameeyey ,wuxuu weydiistey in arrinkaa laga jaahil bixiyo.

Haddey sidaa noqoto wuxuu sheegay inay imaandoonto in sharciyo badan oo la ansaxiyey in laga daba keenidoono sharciyo kale .taasina waxay fowdo ku noqoneysaa sharciyada dalka. Wuxuu intaa ku darey in aan la illaalin xuquuqda dadka, saxaafadda wixii la doono ayaa laga sheegaa ama jaraa'idka lagu daabacaa ama lagu sawiraa. Waxa kaloo jirta in social media oo aad u qaribanyahay ,waxaa lagu tumanayaa oo meel ka dhacweyn lagu sameynaya magacaaga xilkaaga iyo sharaftaada,adduunka hal gabay adiga aad leedahay lama qaadikaro haddii fasax loo haysan hadda waxaa dhacda in qof uu ganacsi ku sameeyo lacag bandanna ku kasbado heyso isaga uusan lahayn,abwaankii soo alifay heeskaas oo meel cidla ah ku dayacanyahay ku gaajoonyahay ama ku jiranyahay,wuxuu soo jeediyey in loo baahanyahay shuruuc ilaalisa arrimahaas.Fikirka Xildh.Xaaf uu qabo uu isagana ku raacsanyahay in la soo qabto kuwa xad gudubka ku sameeya Mediyaha aan la burburin alaabtiisa si asluubeysan loo qabto lana horkeeno sharciga.

Xildh. Axmed Xuseen (Coonka).wuxuu sheegay in aysan dood ka taagnayn xuriyatul qoolka uu caalamka oo dhan leeyahay. Waa in qofka xur u noqdaa ra'yatal qowlkiisa loona baahanyahay in qofka lagu ixtiraamaa .qofka markuu fikirkiisa ka hadlaayo waa inuu waafajiyaa mujtamaca uu la noolyahay waxay aaminsanyihiin sida diinta caqiidooyinkiisa uusan u gefin.Wakaaladda Sona Hinide sharciyeedkaan waxaa lagu soo qorey in hadda la asaasayo Soomaaliya ay horey u lahayd Wakaaladda Sona,tan hadda laga dhigay in la asaasayo maxaa loola jeedaa ?wuxuu soo

jeediyey in ay soo noqdaan inta wakaalo ay dalka ka jiri jirtey oo ka hawgeli jirtey suxufigana aan la caburin.

Xildh. Jaamac Axmed Maxamuud.wuxuu soo jeediyey in la helo sharci ,wasaarad iyo saxafi wasaaradana ay aqoonkororsi u sameyso saxafiyiinta si qoraalkooda u noqdo mid wax ku ool ah.Saxafiga qaldan waa in lagu cayimaa sharciga ganaaxa laga qaadayo,qaladka xariga iyo qaladka saxafinimo look ala saaraa.

Xildh.Nadiifo, waxay sheegtey in sharcigaan uu sheegayo in saxaafaddii qalad gasha ay tallaabo ka qaadeyso Maxkamadda ,waxay soo jeedisey in arrintaas la qeexo waa maxakamadee?Sharciga cusbooneysiintiisa waa imisa jeer ? iyadana la caddeeyaa.

4.Guddoomiyaha Guddiga Warfaafinta Mudane Cabdi Xaashi,wuxuu sheegay in xildh.seynab ay ka hadashay Xuriyadda Saxaafadda,sharcigaana waa mid qeexaya arrimaha saxaafadda oo dhan.Waxaa la horkeenay baarlamanka 2006dii waxaa waqtigaan soo gaarsiiyey cel-celiskii badnaa oo goorwalba la soo celinaayey iy isbedelka xukuumadihii oo sababtey in sharcigaani dib u dhaco.

Xildh.Ibbi ,waa loo mahad celiyey,wuxuuna sheegay Guddoomiyaha Guddiga inXildh.Ibbi uu ka hadley Ansahaxa Saxaafadda waxaana sheegaya Qod.25-aad ee Sharcigaan oo xadidaaya anshaxa saxaafadda. Ilaalinta xuquuqaha gaarka ah ee qofka ,sida caruurta in la faafiyo waa mamnuuc haddeysan ogolaanin cidda ka mas'uulka ah.Saxaafadda way ka reebantahay sawiro argagax gelinaaya bulshada sida qof la gowracaayo.

Xildh.siciid ,wuxuu ka Hadley lacagta wuxuu ka hadley lacagta laga qaadayo saxaafadda sharcigaan ayaa caddeynaya qaabka canshuurta loo qaadayo iyadoo lagu saleynaayo tariifadda canshuurta ee dowladda.Diiwaangelinto waa hal mar canshuurta waa sannadle.

Qod. 29-aad ,wuxuu sheegayaa in ay reebantahay in la faafiyo been abuur shaqsi,Hay'ad ama dowlad haddey dhacdo in loo gefo, waa in saxaafaddii geftey ay raaligelin ka bixisaa muddo 48 saac gudahood cidda ay u geftey, haddii raali gelintaa lagu qanciwaayo waxaa loo gudbinayaa maxkamadda awooda u leh qaadista danbigaas .

Wasaaradda ayaa laga rabaa inay sameyso xeer-hoosaad xadidaaya in ay reebantahay in hal abuur ama sawiro qof leeyahay in la faafiyo isagoo aan ogolaansho laga heynin qofkii iska lahaa.

Qod.36-aad farq.1-aad waxay sheegaysaa in suxufigo waa in la siiyaa xogkasto uu u baahdo oo u fududeynaya in uu howshiisa guto ,haddii xogtaasi ayan ahayn mid halis ku ah amaanka Dalka.

5.Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta Mudane Maareeye,wuxuu u mahadceliyey xildhibaanadii ra'yigooda halkaan ka soo jeediyey ,sidoo kale wuxuu bogaadiyey guddiga warfaafinta sida ay ugala shaqeeyeen sharcigaan wasaaradda.Sharcigaan 2006 dii ayuu diyaariyey Wasiirka markuu ahaa Wasiirka warfaafinta,2007diina wuxuu ku wareejiyey wasiirkii isaga ka danbeeyey Mudane Cali Jaamac Jangeli.kadib ilaa 8 wasiir ayaa ka sii danbeysey,xillikastana Baarlamanka waa la horkeenayey ,laakiin dib ayaa loo celinaayey weligiisna lama ansaxinin ,maanta golaha Baarlamanka ayuu horyaalaa isagoo howl iyo waqtibadan la geliyey .

wuxuuna ka codsadey Golaha Baarlamanka in ay ansaxiyaan hindise sharciyeedkaan waayo dhibaato badan oo hadda taagan ayaa la rabaa in uu daaweeyo.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu sheegay in Guddiga ay ku soo daraan wixii halkaan laga soo jeediyey.wuxuuna u hambalyeeyey Maxamed Cai Xaashi oo loo doortey Guddoomiyaha Baarlamanka ee Punt-Land.

Kal.7-aad Kul.6-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiye K/X.1-aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 1:00 gd.